



NATIONWIDE CHILDREN'S
When your child needs a hospital, everything matters.

Helping Hand™

Health Education for Patients and Families

Qalabka Qaadista Qabashada Kaadida Nadiifka ah ama Clean Catch Urine Collection (Somali)

Muunada kaadida qabashada nadiifka ah ayaa la aruriyaa si loo ogaado noocyada bakteeriyaaalka (jeermiska), haddii ay wax, ku jiraan kaadida canugaaga). Waa in baaritaanka si sax ah loo sameeyaa si canuggaagu u helo daaweynta caafimaadka ee ugu habboon. Raac tilaabooyikan si aad ooga hortagto jeermiska banaanka jirka cunugaada uu galo muunada kaadida.

Waxaad U baahaneysaa

- ☐ Qalabka Qaadista Qabashada Kaadida Nadiifka ah **ama**
- ☐ Baakat uu kujiro weel nadiif ah (Sawirka 1) kaasoo leh dabool lagu xiro iyo 3 tirtire saabuun

Sida loo calaamadeeyo Muunnada

1. Magaca cunuga sharciga ah oo dhameystiran – buuxi magacyada koowaad iyo magaca labaad, hingaada saxda ah
2. **Mid** ka mid ah aqoonsadayaasha gaarka ah:
 - Taariikhda dhalashada **ama**
 - Lambarka Aqoonsiga Bukaanka **ama**
 - Nambarka Diiwaanka Caafimaadka ee NCH (NCH Medical Record Number)

Waxay noqon kartaa mid aad kuu caawisa in aad samayso talaabada 1 iyo 2 kahor inta aadan bilaabin aruurinta.

3. Taariikhda uruurinta muunada (MM/DD/YYYY) – tan **kadib** uruurinta
4. Taariikhda uruurinta muunada (oo ay ku jirto subaxdii ama galabtii) – qor tan **kadib** uruurinta



Sawirka 1 Waxaa kaadida lagu aruurin doonaa weel nadiif ah oo leh dabool lagu xiro.

Xaruumaha caafimaadka ee Nationwide Children's waxay ku siin karaan calaamadda diiwaangelinta EPIC si aad weelka ugu dhajisid.

Sida Looga Soo qaado Muunad Kaadida Caruurta Labka ah

1. Gacmaha dhaqo oo alaabta dhig meel la gaari karo. Ka qaad furka weelka waxaadna galisaa gudaha asaga oo kor u jeeda. Kaliya taabo qaybaha kore ee furka iyo weelka. Gasho gacan gashi baaritaanka haddii aad rabto.
2. Fur dhammaan 3 da tirtire ee saabuunta waxaadna dul dhigtaa meel nadiif ah. Qaado midkood si aad ugu billoowdo in aad ku nadiifiso xubinta taranka ee canuggaaga.
3. Ku nadiifi (madaxa) xubinta taranka istiraashada. Isticmaal daliigid wareeg ah. (Haddii canugaaga aanan la gudin, gadaal u soo jiid maqaarka shufta oo nadiifi dhammaan.) Iska tuur istiraashada.
4. Ku celi Talaabada 3 aad laba jeer oo kale adiga oo isticmaalaya istiraasho cusub markasta.
5. Soo qaado weelka qaadista kaadida. Ha taaban gudihiisa.
6. Canugaaga miyuu bilaabay ku kaadinta musqusha. Kadib qabo weelka ka hooseeyo qulqulka kaadida iyo qaad ugu yaraan 1 waqiyadood oo kaadi ah (30 mL). (Fiiri leemanka ku calaameysan dhinaca weelka.) Ka qaad furka una ogolow in canuggaagu ku dhammeeyo kaadida suuliga. (Haddii canugaaga aanan la gudin, jiid maqaarka shufta dusha madaxa guska kadib qaadida kaadida.)
7. Soo qaad koobka, adiga oo kaliya taabanaya dhinacyadiisa, waxaadna dhex galisaa weelka. Iska hubi in daboolka inuu dhuuqsanyahay si kaadidu aysan u daadan. Waxaad maqleysaa cod riix ah marka furka si ku habboon loogu xiro weelka. Tirtir qaybta kore ee weelka oo qalaji.
8. Haddii aad xirantahay gacmo gashi iska saar. Si fiican u farxalo.

Sida loo qaado Muunada caruurta dhidiga ah

1. Gacmaha dhaqo oo alaabta dhig meel la gaari karo. Ka qaad furka weelka waxaadna galisaa gudaha asaga oo kor u jeeda. Kaliya taabo qaybaha kore ee furka iyo weelka. Gasho gacan gashi baaritaanka haddii aad rabto.
2. Ka saar canugga hoos gashiga hana ku fariisto suuliga.
3. Fur dhammaan 3 da istiraasho waxaadna dul dhigtaa meel nadiif ah.
4. Si saani ah u kala bixi 2 da duub ee maqaarka ah ee dulmarayo marinka kaadida.
5. Istiraashada koowaad, ku tir dhinaca midig ee furitaanka kaadida. Iska hubi inaad tirtid gadaal. Iska tuur istiraashada.
6. Istiraashada labaad, ku tir dhinaca furitaanka kaadida bidix. Iska hubi inaad tirtid gadaal. Iska tuur istiraashada.
7. Istiraashada saddexaad, ku tir furitaanka kaadida aaga bartamaha. Iska hubi inaad tirtid gadaal. Iska tuur istiraashada.
8. Soo qaado weelka qaadista kaadida. Ha taaban gudihiisa.
9. Canugaaga miyuu bilaabay ku kaadinta musqusha. Kadib qabo weelka ka hooseeyo qulqulka kaadida iyo qaad ugu yaraan 1 waqiyadood (30 mL). (Fiiri leemanka ku

calaameysan dhinaca weelka.) Ka saar furka qulqulka kaadida oo u ogoloow canuggaaga inuu dhameeyo ku kaadinta musqusha.

10. Soo qaad koobka, adiga oo kaliya taabanaya dhinacyadiisa, waxaadna dhex galisaa weelka. Iska hubi in daboolka inuu dhuuqsanyahay si kaadidu aysan u daadan. Waxaad maqleysaa cod riix ah marka furka si ku habboon loogu xiro weelka. Tirtir qaybta kore ee weelka.

11. Haddii aad xirantahay gacmo gashi iska saar. Si wanaagsan u dhaqo gacmaha.

Markii la soo Qaado Muunada Kadib

1. Hubi sumadda si aad u xaqiijiso in uu leeyahay magaca sharciga ah ee canugaaga oo buuxa, taariikhda uu dhashay, lambarka aqoonsiga bukaanka ama lambarka diiwaanka caafimaadka. Kaddibna waxaad qortaa taariikhda iyo wakhtiga aruurinta kuna dhaji sumadda weelka dushiisa. Fadlan ogoow, muunadda lama baari doono haddii uusan magaca ama ugu yaraan aqoonsi kale oo uu bukaanku leeyahay ku dheganayn sumadda.
2. Ku meelee weelka kaadida boorso bac ah oo dib loo xiri karo.
3. Sii weelka daryeelaha caafimaadka ama, haddii qaadida lagu sameeyay guriga, ugu keen muunada Xarunta Adeega Sheybaarka **30 daqiiqo gudahood** qaadida kadib. Haddii aadan ku keeni karin 30 daqiiqo gudahooda, ku haay barafka ama farantijeerka, laakin ma AHAN barafka. Muunada kaadida waa in lagu hayaa meel qabow ah waa in lagu baaraa 24 saac gudahooda kaddib marka aruurinta la dhameeyo.
4. Ku meelee weelka kaadida qaboojiyaha barafka dushiisa ah marka aad keentid isbitaalka ama shaybaarka. Ha dul dhigin barafka agagaarka weelka sida laga yaabo inuu barafoobo.
5. Fadlan la imoow canugaaga marka aad muunada kaadida keeneysid sheybaarka. Waxaa laga yaabaa in aan codsano in aan ka helno muunad cusub.

Xulashada keenista

Haddii aad rabto inaad ogaato saacadaha ganacsiga iyo goobaha la geeyo muunada, wac Adeegyada Sheybaarka adoo ka wacaaya (800) 934-6575 ama booqo NationwideChildrens.org/Lab.

Xiliga malintii, keen muunada meesha:

- Xarunta adeega sheybar kast ama Xarunta *Close To Home*SM ee Nationwide Children's Hospital.
- Sheybaarka Nationwide Children's Orange ee ku yaala 555 S. 18th Street, Columbus, Ohio 43205.

Fiidkii:

- Waaxda Ogolaanshaha Isbitaalka ee Nationwide Children's ee xarunta guud.

Fadlan ha geynin muunada kaadida ah Waaxda Degdega. Wixii su'aalo ah, ka wac Adeegyada Shaybaarka (800) 934-6575 ama daryeel bixiyahaaga caafimaadka.